



Dugsiga Sare Franklin

5405 SE Woodward St | Portland, OR 97206 | (503) 916-5140 | www.pps.net/franklin

Warbixinta aragtida Franklin: **Franklin Awood leh: Dhaqanka, Bulshada, iyo Mustaqbalka** waa ereyo muujinaya nuxurka ujeedooyinkeena iyo hadafka dugsigeena.

Dhaqanka: Taariikhda Dugsiga Sare ee Franklin ay ku leedahay xaafadda Koonfurta Tabor ee Portland waa mid qoto dheer oo joogto ah. Inka badan qarni, jilal kala duwan oo qoysas ah ayaa soo dhigtay dugsiga isla markaana soo dhaweeeyay arday cusub oo sii wada xoojinta caadooyin iyo dhaqan markii horeba ahaa mid hodan ah.

Bulshada: : Franklin waxay hada soo dhaweysa oo 28 luqadood oo kala duwan oo ay ku hadlaan ardaydeena iyo qoysaskoodu. Dugsigu wuxuu bixiyaa taageero iyo jawi kala duwan oo loogu talagalay qoysaskeena iyo bulshadadeena si ardaygeena loogu diyaariyo waxbarasho muddadeedu dheer tahay.

Mustaqbalka: Waxaanu ku faraxsanahay in qaran ahaan naloo aqoonsado shaqadayada ku aadan yaraynta farqiga u dhexeeya dhanka guul gaarida iyo xajijinta guusha tacliimeed ee arday kasta. Waxaa naga go'an bixinta waayo-aragnimo waxbarasho oo tayo sare leh kaasi oo loogu talagalay dhammaan ardayda. Dhaqankayaga tacliimeed waa mid ay hagayso aragtii ah in dhammaan ardayda si buuxdu ugu diyaar garoobaan sii ambo qaadida tacliinta sare ee noocyada kala duwan leh. Koorsadayada shaqo iyo barnaamijiyada kala duwan waxay gacan ka geystaan ballaarinna iyo xoojinta aqonta ardayda, waxay kordhisaa xirfadahooda iyaga oo dhiirigeliya kalsoonidooda si ay u gaaraan ujeedooyinkooda mustaqbalka.

Tilmaamaha Franklin

Fasallada Meelaynta Horumarsan: AP Calculus, Tirokoobta AP, Curiska Luqadda Ingiriisiga ee AP, Suugaanta iyo Curiska Ingiriisiga ee AP, Dowladda US ee AP, Psychology AP, Luqadda iyo Dhaqanka Shiiinaha ee AP, Taariikhda Maraykanka ee AP, Chemistry-ga AP, Biology-ga AP, Physics-ka B ee AP qaybta 1 iyo 2, Sayniska Deegaanka AP, Naqshadaynta AP2D, Taariikhda Farshaxanka ee AP, Taariikhda Dunida ee AP, iyo Luqadda iyo Dhaqanka Isbaanishka ee AP. Labada credit-ka ah 'dual credit' ee la kala dooranayo ee koorsooyinka CTE, Ingiriisiga, Qoob ka Cayaarka iyo Faransiiska.


Luqadda Adduunka: Franklin waxay ardayda siisaas khibrad tayo leh iyada oo la adeegsanayo waxbarashada luqadda iyo dhaqanka. Ardaydu waxay haystan fursad ay ku kala dooranayaan luqadaha Faransiiska, Isbaanishka, Shiiinaha, Jarmalka iyo Habka Waxbarid ee Isbaanishka. Ardaydu way sidoo kale heli karaan Dadka Labada Luqaddood Ku Hadla ee Oregon "Oregon Seal of Biliteracy", Astaantu waa mid lagu aqoonsado ardayga jalin-jabinayaa in uu tacliin ahaan soo bandhigo aqonta uu u leeyahay laba ama wax ka badan oo luqaddood.

"Waxaa waxbarasho bilaal lacag ah la iga siiyey Iskuul gaar loo leeyahay laakiin waxaa ka doobiday Franklin halkii aan qaadan lahaa sababta oo ah waa iskuul ardeydiisu ay kala duwan tahay aragtidoonahay mid kala gedisam."

—Victor Candia, Fasalka 2019

Franklin by the Numbers

Tirooyinka Qalin Jabinta Franklin ee 2009-2015



Source: Oregon Department of Education

Guusha ardeyda koorsooyinka la horumariyey (AP) Sanadihi 2011-2016

- Kor u kaca tirada ardeyda koorsooyinka AP 126%
- Kor u kaca tirada imtixaanada koorsooyinka AP 120%
- Dhibcaha imtixaanada koorsooyinka AP ee 3 ama ka sareeya kor u kacay 147%

Source: AP website

“Dugsigan Franklin, ardaydu waxay ka raadin karaan waxyabaha ay xirfad ahaan ay aad u jecel yihiin iyagoo xiisahoodana ku guulsan kara. Ardaydu sidii ay ugu guuleysan lahaayeen waanu hubinaa sidii ay heerkooda ugu sareeya ugu guuleysan lahaayeen ee kulliyada iyo xirfadaha- iyagoo diirada saaraya casharada ay qaataan iyadoo taageerada la siinyaana u ogolato inay iyaga oo aan cabsaneyn ay tijaabiyan khatarta. Waa aanu nahay bulsho xoogan oo leh aqoonyahanofican leh, taageeradooduna koox ahaan iskugu tiirsan tahay, waxa aanu nahay bulsho dadaal badan oo iskaashata waxaaban oran karnaah iyaga iyo ardayda ugu wanaagsan. Nagu soo biir- Saaxiib nala noqo! ”

—Juanita Valder, Maamulaha



Dib u casriyeeynta Franklin: Dayta 2107-ka ardayda, macallimiinta iyo shaqaalaha Dugsiga Sare ee Franklin waxay ku soo laabteen dugsiga cusub ee dib loo casriyeeyay, xarun waxbarasho oo la jaanqaadaya qarniga 21 -aad. Dugsigu wuxuu leeyahay dareenka ah dhisme dugsi oo furan, oo leh xarumo farshaxanka lagu barto oo casri ah, goobo shaqo oo lagu barto CTE iyo meelaha wax lagu barto, iyo tiknoolajiyad heerar sare ah iyada la adeegsanayo dhammaan goobta.

Kulliyad iyo Shaqo:

Koox dadaalaysa oo ka kooban 6 La-taliyayaal iyo 1 Iskuduuhaha Kulliyadda iyo Xirfadda ah ayaa ardayda ka taageera inta ay u soo socdaan jidka dugsiga sare kulliyada iyo shaqada ka dib. Franklin waxay sidoo kale bixisa barnaamij kulliyada oo loogu diyaar garoobo AVID kaasi oo bara xirfaddo ardayda loogu diyaarinayo guul gaarida dugsiga sare, kulliyadda iyo xirfaddo shaqo oo ay yeeshaan.

Fursadaha Farshaxanka waxaa ka mid ah

- | | | |
|---|---|--|
| • Kooxda Riwaayaada | • Qoob ka Cayaarka: Bilowga ilaa Soo Bandhigida | • Farshaxanka Masraxa: Farsamada Masraxa/ Soo saarida Cayaarta |
| • Kooxda Muusikada | • Dhoobada | • Jilida: Bilowga ilaa Gaarida Heer Horumarsan |
| • Kooxda Muusikada Xarkaha | • Sawirka Farshaxanka | |
| • Barashada Muusikada Xarkaha ee Bilowga ah | • Sawirro Muujinta | |
| • Koox Riwaayaadeed | • Sawir qaadida | |



Xirfadda Farsamada Waxbarashada (CTE) iyo Barnaamijyada Gaarka ah waxaa ka mid ah

- | | | |
|--------------------------|--------------------------|---|
| • Maamulka Ganacsiga | • Caafimaadka-Bayolajiga | • Sharciga Dhanka Dastuurka |
| • Soo saarida Fiidiyooga | • Ka shaqaynta Alwaaxa | • Tababarka Waxbarashada Cilmiga Kambiyutarka |
| • Fanka Wax Karinta | • Biraha | |



Doorashada Tacliimeed waxaa ka mid ah

- | | | |
|-------------------|--|-------------------------------------|
| • Buug-sanadeedka | • Muusikada | • Ardayga Dowladda |
| • Saxaafadda | • Injineernimada Qalabka Iswada 'Robotics' | • Horumarinta Wax hoggaaminta/Shaqo |
| • Fanka | | |



Cayaaraaha waxaa ka mid ah

- | | | |
|----------------------------|------------------------|-----------------------|
| • Kubadda cagta | • Lagdinta | • Cayaaraaha Fudud |
| • Kubadda cagta Maraykanka | • Dhiirigelinta kooxda | • Kubadda tenniska |
| • Iskaga Gudbiida Waddanka | • Kubadda kolayga | • Kubadda baseball-ka |
| • Kubadda laliska | • Dabaasha | • Kubadda softball-ka |

Gaaritaanka Bulshada iyo Taageerada Ardayda waxaa ka mid ah

- | | | |
|---|---|---|
| • ASPIRE: Wax barida Dugsiga Ka dib | • Xarunta Caafimaadka Degaanka Multnomah (Goobta laga helayo) | • Barnaamijka Koorsoyinka U diyaar garowga -kulliyada ee AVID |
| • Koorsooyinka Taageerada ELD | • Isku duwayaasha Guusha Ardayga | • TAG |
| • In ka badan 40 Naadi | • GEAR UP loogu talagalay Barnaamijka Kulliyadda | |
| • Dugsiga SUN (Dugsiga ee Midaynta Xaafadaha) | • Wakiilka Bulshada | |
| Barnaamijka Dugsiga Ka dib | • Barnaamijka Cashada ee Dugsiga Ka dib | |
| • STEP UP | | |

